



Waxqabadka Gaarka u ah Horumarinta Xiriirka

Ku caawi ubadkaaga inuu barto eryo cusub, una sheeg fikrado markii la qabanaayo hawlaha soo socda.

1. Hawlaha Maalin kasta
 - Dhar xirashada
 - Wakhtiga cuntada/wakhtiga cuntada fudud
 - Hawlaha farsamada
 - Wakhtiga jiifka
 - Wakhtiga sheekada
 - Ciyaarta
2. Buugagga sawirka
 - Ha isku taxluujin akhriska ereyada, kala hadal sawirka.
3. Bazzalyada (mas'alado)
 - kala hadal ubadkaaga waxa uu sammeynaayo iyo xaaladda uu ku sugan yahay sawirka bazzalka.
4. Kaalinta Ciyaarta/Dhar-Xirasho
 - Tusaale: dukaan, guri, dugsi iyo w.m.a.
5. Hawlaha Farsamada
 - Sawir la samee ubadkaaga (sawir, midabee, isku dheji, jar-jar iyo w.m.a.) Kala hadal ubadkaaga waxaad sammeyneyso iyo wixii aad hore u sammaysay.
6. Istiikerada dib loo isticmaalo/ (sida xirmo keligeed)
 - U sheeg sheekooyin
 - Istiikerada u kala saar koox-koox (sida xoolaha, dharka iyo w.m.a.)
 - Dooro kuwa is-raaci kara, una fasis sababta (tusaale, burushka ilkaha iyo daawada ilkaha way is raacaan waayo markii aad rumeysaneysid waxaad daawada ilkaha aad kor saartaa burushka ilkaha).
7. Alaabta lagu ciyaaro
 - Ku ciyaar alaabta lagu ciyaaro ee ubadkaaga ka helo.
 - Ku ciyaar noocyo kala duwan ee alabta lagu ciyaaro (toys) iyo waxyaabaha maalin kasta sida: dharka, alaabta jikada iyo w.m.a.
8. Muusikada/Maansda Xannaanada/ Fara ka Ciyaarka
 - La hees ubadkaaga heeso tartiibsan ama maanso ku cel-celi.
Samee dhaqdhaqaaq raaci kara heesaha